

MINNESOTA DEPT HUMAN SERVICES
PO BOX 64960
SAINT PAUL MN 55164-0960

Taariikhda: <DATE>
Lambarka Kiiska: < CASE
NUMBER>

<First Name> <MI> <Last Name>
<Street 1>
<Street 2>
<City> <State> <Zip Code>

Maxaa keenay in warqaddan lagu soo diro?

Isbeddel lagu sameeyay caymiska Medical Assistance ayaa laga yaabaa inuu ku saameeyo. Laga billaabo Oktoobar 1, 2026, sharci federaal ah ayaa beddelaya cidda u qalmi karta caymiska Medical Assistance. Isbeddelkan wuxuu khuseeyaa oo keliya dadka aan ahayn muwaadiniinta Mareykanka ama dadka aan muwaadiniin ahayn balse si sharci ah ugu tirsan Mareykanka.

Si aad u sii haysato caymiska Medical Assistance taariikhdaas ka dib, dadka aan muwaadiniinta ahayn ee si sharci ah dalka ku jooga, da'dooduna tahay 21 sano ama ka weyn, isla markaana aan uur lahayn, waa inay leeyihiin mid ka mid ah xaaladaha socdaalka ee soo socda:

- Qof haysta Degganaansho Joogto ah oo Sharci ah (haysta giriin kaarka)
- Soo-gale ah Cuban ama Haitian, ama
- Muhaajir ku hoos jira Heshiiska Xiriirka Xorta ah (COFA) (ka yimid Jasiiradaha Marshall, Micronesia, ama Palau).

Maxaa habboon inaad hadda samaysid?

La xiriir isla markiiba wakaaladda adeegyada bulshada ee degmadaada ama qabiilkaaga asalka ah haddii:

- Aad dhowaan noqotay Qof Haysta Sharciga Degganaanshaha Joogtada ah, Soo-gale Cuban ama Haitian ah, ama Muhaajir ka soo jeeda dadka dalalka COFA;
- Aad dhowaan noqotay muwaadin Mareykan ah ama qof aan muwaadin ahayn balse si sharci ah ugu tirsan Mareykanka; ama
- Aad uur leedahay. (Sharciga cusub kuma khuseeyo haddii aad uur leedahay.)

Lambarka taleefanka iyo cinwaanka wakaaladda adeegyada bulshada ee degmadaada ama Tribal Nation asalka ah waxaad ka heli kartaa liiska warqaddan la socda.

Maxaad filan kartaa tallaabada xigta?

Dhamaadka bisha Agoosto iyo horraanta Sebtembar, waxaan dib u eegi doonnaa kiisaska caymiska Medical Assistance ee dadka xaaladdooda socdaal awgood laga yaabo inaysan mar dambe u qalmin barnaamijka. Haddii aadan mar dambe u qalmin, waxaan kuu soo diri doonnaa ogeysiis ku sheegaya in caymiskaaga Medical Assistance uu dhammaan doono Sebtembar 30, 2026.

Ma heli kartaa barnaamij kale oo daryeel caafimaad?

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto caymiska MinnesotaCare ama barnaamij kale oo daryeel

caafimaad haddii aad si sharci ah ugu joogto dalka isla markaana aad buuxiso shuruudaha kale ee barnaamijka. Waxaan kuu soo diri doonnaa codsi haddii loo baahdo macluumaad dheeraad ah si loo go'aamiyo inaad u qalanto caymiska.

Xaggee ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah ama caawimaad?

Aad linkigaan <https://mn.gov/dhs/federalchanges/lawfully-present> ama isticmaal nambarkaan QR si aad u hesho wararkii ugu dambeeyay.



Caawimaad ka timaadda qof ah hage (navigator): Waxaad heli kartaa caawimaad bilaash ah oo ka timaadda hage. Aad linkigaan <https://www.mnsure.org/help/find-assister/index.jsp> ama isticmaal lambarka QR koodka si aad u hesho hage jooga aagga deegaankaaga.



Caawimaad ka timaadda Xafiiska Barnaamijyada Dib-u-dejinta: Xafiiska Barnaamijyada Dib-u-dejinta, la-hawlgalayaasheenna iyo bulshooyinkeenna, waxay soo dhoweynayaan qaxootiga iyo dadka ku jira ilaalinta bini'aadantinimo ee Minnesota si ay dib ugu dhistaan noloshooda, u helaan fayyo-qab, uguna qayb qaataan dhaqaalaha gobolka.

Wac Khadka Caawinta Qaxootiga iyo Soo-galootiga ee xafiiska 1-800-814-4806 si aad u hesho caawimaad ku saabsan adeegyada iyo taageerada bulshada ee aad heli karto.